

# Ma waxaad moodey in aadan awoodin caymiska caafimaadka? Mar kale ka fikir.

**Caawinaad dhaqaale, gargaar shaqsi ahaaneed iyo qorshooyin dhameystiran ee caymiska caafimaadka oo kaliya laga heli karo MNsure.**

## Adeegga Caymiska Halka-Meel

MNsure waa meesha reer Minnesota ay ka heli karaan oo ay iskugu barbar dhigi karaan noocyada caymiska caafimaadka ee laga helo shirkadaha sida gaarka ah loo leeyahay si aad ku hesho ceymis caafimaad dhameystiran kasoo si fiiciian ugu habboon rabitaankaaga iyo dakhligaaga. Waxaa xitaa aad saxiixi kartaa barnaamijyada bulshada sida Gargaarka Caafimaadka ama DaryeelkaMinnesota.

Badanaa reer Minnesota waxay heli doonaan nooc qaar caawinaad dhaqaalo, oo MNsure ayaa ah meesha kaliya aad ka heli karto. Caawinaadaada dhaqaale wuxuu u dhaxayn karaa qiimo dhimis ilaa qorshe caymis caafimaad oo lacag la'aan ah.

Haddii aad hadda iibsatay caymis caafimaad oo kuu gaar ah, ama aad tahay qof caymis aan lahayn, waxaad isticmaali kartaa MNsure.

## Hel Caawinaad Shaqsiyeed

Iska diiwaangelinta caymiska caafimaadka waa lagu wareeri karaa. Taasi waa sababta MNsure ay u bixiso, caawinaad shaqsiyeed oo lacag la'aan ah ay bixiyaan hagayaal tababaran oo shahaado wato iyo dilaaliin.

Haguhu waa qof ka yimid urur lagu kalsoon yahay oo ku hagi kara talaabo kasta ee geybaha codsiga ka mid ah oo kaa caawiya inaad si natiijo leh isku diiwaangeliso.

Dilaalka wuxuu gaari karaa hal talaabo dheeri ah. Sida xirfadle shatiyeysan, dilaaleydu waxay bixin karaan talo iyo waxayna kaa caawini karaan in aad dooro qorshaha caafimaadka ee ugu fiican oo aad u qalanto oo si wanaagsan u la kulmi kara baahidaada ama ta qoyskaga.

MNsure
mnsure.org 1-855-366-7873

# Mar kale fikir. Hel caymis.

## Faa'iidooyinka Aad Hadda Isticmaali Karto

Qorshayaasha caafimaadka oo idil waxaa ku jira nacfiyadaan caafimaadka ee muhiimka ah:

- Adeegyada degdegga ah
- Isbitaal seexashada
- Adeegyada shaybaarka
- Adeegyada xaamilada iyo ilmaha
- Caafimaadka dhimirka iyo dhaqanka
- Adeegyada bukaan-socodka ("outpatient services")
- Daryeelka caafimaada ilkaha iyo aragga ee caruurta
- Daawo qorista.
- Kahortagidda iyo ladnaanshaha
- Adeegyada baxnaanistsa iyo habdhaqanka iyo qalabka.

Faa'iidooyinkaas ayaad heli karaa in aad isticmaalo maalinta ugu horeyso oo aad saxiixdo.

- Qorshayaasha MNsure ma laha reebitaan xaaladaha horey u jiray.
- Ma laguu diidi karo caymiska ama laguguma siyaadin karo qarash sare sabab ah taariikhdii caafimaad.
- Ma jiro xad sannadle ah ama xad doolar ah ee waaro ee caymiska.

## Hel caymis 2016

Xilligi diiwaangelinta furan ee 2016 caymiska wuxuu bilaabmaa Nofembar 1, 2015, iyo wuxuu dhamaadaa Jannaayo 31, 2016. Inta lagu jiro wakhtigan, dadka degan Minnesota waxay buuxin karaan codsiga iyo waxay ogaadaan haddii ay u qalmaan caawinaad dhaqaale.

Dadka reer Minnesota ee xaqa u leh Gargaarka Caafimaadka ama DaryeelkaMinnesota waxay is diiwaangelin karaan sannadka oo dhan.

Dad badan ama qoysaska, xataa kuwa shaqeeyo, waxay xaq u leeyihiin kaalmo dhaqaale. Haddii dakhligaaga ugu sareeyo ee sannadlaha uu ka hooseeyo lacagta hoos ku qoran ee cadadka qoyskaaga, waxaad u qalmi kartaa.

| Tirada Qoyska | Dakhliga Sannadkiiba |
|---|---|
| 1 | $47,080 |
| 2 | $63,720 |
| 3 | $80,360 |
| 4 | $97,000 |
| 5 | $113,640 |
| 6 | $130,280 |

## Saddex siyabood ee lagu helayo caawimaadda iskuqorista.

### Hageyaal

Shaqsiyaad tababar ka haysta ururo bulsho oo lagu kalsoonyahay ayaa waxay si fool ka fool ah kaaga caawinayaan arji buuxiinta, iskuqorista iyo dabagalka.

### Wakiillada iyo Dillaallada

Xirfadlayaal tababaran oo shati leh ayaa si fool ka fool ah kaaga caawinaya iskuqorista iyo talooyin aad ku dooranaysid qorshaha.

### Xarunta Wacitaanka MNsure

1-855-3-MNSURE
(855-366-7873)
Takhasuslayaal tababaran ayaa diyaar ah si ay uga jawaabaan su'aalahaaga ayadoo loo marayo telefoonka lacagla'aanta ah.

Raadso hageyaal, waakiillo iyo dillaaleyaal kuu dhow. Guji "Assister Directory" (Diiwaanka Caawiyaha) ee bogga internetka ee MNsure.org.

mnsure.org    facebook.com/mnsure    @MNsure